



Xaqqa uu Kirestahu ku wacan karo Caawimaad

A Tenant's Right to Call for Help

Haddii aan kireysto guri, Ma ka wacan karaa 9-1-1 gurigayga?

Haa waxaad xaq u leedahay, inaad ka wacato bilays ama gargaar degdeg ah gurigaaga. Waxa aad u wacan kartaa sababtoo ah dagaal qoyska dhexdiisa ka dhaca, xoogid, ama wax kale oo fal ah oo xun. Sidoo kale waxa aad u wici kartaa naftaada ama qof qoyska xubin ka ah oo u baahan caawimaad dhanka caafimaadka miyir iyo xiska ah.



Qolada guriga aan uga jiraa ma xadidi kartaa inta goor ee aan wicitaano 9-1-1 ah aan sameyn karo?

Maya. Qolada guriga aad uga jirtaa ma ay xadidi karaan inta goor ee gargaarka degdeg ah aad wacan kartid. Kaama ay mamnuuci karaan inaad wacato bilayska ama adeega gargaarka degdeg ah.

Qolada guriga aan uga jiraa ma ii ciqaabi karaan ka wicida 9-1-1 gurigayga awgii?

Maya. Lagugma ciqaabi karo wicida bilayska ama dalbashada gargaar xataa hadii uu liiskaagu oronayo waa laguu ciqaabi karaa hadii aad sameyso. Tusaale ahaan, qolada gurigu kaagama saari karaan guriga ama ma kordhin karaan kiradaada sababtoo ah waxa aad wacatay bilayska.

Qoladu guriga aan uga jiraa ma iga saxiixi kartaa liis ama warqad aan ku ogolaanayo inaanan wici karin bilayska ama gargaarada degdeg ah?

Maya. Xaquuqdaada aad ku wici karto bilayska ama gargaarka degdeg ah waxaa sugaya sharciga Minnesota. Qolada guriga aad uga jirtaa iskuma dayi karto inaad faraha ka qaado (“tasaanusho”) xaqqaaga aad ku wacan karto caawimaad.

Ka waran hadii deegaanka hoose uu ka jiro sharci ciqaaba kiraystayaasha ama qolada guryaha leh wicitaanada badan ee 9-1-1 ka laga soo waco gurigooda?

Sharciga gobolku waxa uu leeyahay laguuma ciqaabi karo wicitaanada caawimaad helida – in kasta ha ahaato inta goor ee aad waco caawimaad. Guriga lagaagama saari karo ama laguma ganaaxi karo xataa hadii ay jiraan sharciyo magaaladu leedahay oo oranaya qolada gurigu waa inay guriga ka saartaa ama ay ganaaxdaa kiraystaha tiro cayiman oo wicida 9-1-1 ah ka dib.

Haddii sharciyada magaal u yaal ama mid gobolku leeyahay aysan iswaafaqsanayn, raac sharciga gobolka. U sheeg qolada guriga inay eegaan Qodobka xeerka ee Minnesota Statute [§504B.205](#).

Ka waran haddii wicitaanadayda 9-1-1 loo isticmaalo in aniga wax la igu yeelo?

Inaad la kulanto wax ciqaab ah oo ku salaysan wicidaadda 9-1-1, sida ogaysiis jabin liis heshiis, ogaysiis guri ka bixid, ama joojin liis heshiis, waa sharci-darro.

Isticmaal foomka halkan ku lifaaqan si aad ugu sheegto qolada guriga xaquuqdaada sharcigu kuu ogol yahay ee aad ku wacan karto bilayska ama gargaar degdeg ah sababtoo ah dagaal qoyska dhexdiisa ka dhaca, xoogid, ama wax kale oo fal ah oo xun. Warqadu waxa ay ka codsataa qolada gurigu inay ka noqdaan ciqaabta ama falka xun ee ay damacsan yihiin.

Ogow: Haddii wax adiga ama martidaaddu sameysay uu xad gudub ku yahay heshiiska liiska guriga, kolkaa qoladda guriga waxaa dhici karta inay adigu kuu isticmaasho taa si ay wax kuu yeelaan, laakiin uma ay isticmaali karaan wicitaanka bilayska ama adeegyada gargaarka degdeg ah inay sabab uga dhigaan inay guriga kaa saaraan ama ay ku ganaaxaan.

Maxaan sameyn karaa hadii qolada guriga aan uga jiraa aysan u hogaansamayn sharciga gobolka?

Waxa aad ku dacaweyn kartaa wixii jabin ah ee ku saabsan sharcigan. Waxaad kaloo waydiisan kartaa maxkamadi inay kuu xukumo \$250 halkii jabin oo kasta **AMA** waxa aad waydiisan kartaa in lagu siiyo wixii xoolo ah ee dhib ah ee kaa dhumay (sida, kharashka guurida), hadba kii weyn.



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

Date (Taariikhda): _____

Manager/Landlord/Management Company: _____
(Maamulaha/Qolada/Shirkada Maamulka)

Address (Ciwaanka): _____

City, State & Zip Code: _____
(Magaalada, Gobolka & Ziip Coodka)

RE: Landlord Action after Emergency Phone Call

(Tixraac: Falka Qolada Guriga ka dib Telefan Wicida Degdeg ah)

Dear (Qaaliga ahow), _____ :

On _____ you gave me (check those that apply):
(Ee ... Waxa aad I siisay (calaamadi kuwa quseeya))

- an infraction notice (ogaysiis ah khalad gaysi)
- a notice to vacate (ogaysiis guriga inaan baneeyo ah)
- a lease termination notice (ogaysiis joojinta liiskayga ku saabsan)
- Other (describe) (Kuwa kale (tilmaam)): _____

You said you were taking this action because _____.
Waxa aad tiri waxa aad talaabadan u qaadaysaa sababta ah....

I believe you are taking this action because of my phone call(s) for police or emergency assistance.
Waxa aan aaminsanahay waxa aad talaabadan u qaadaysaa sababta oo ah wicitaanadii aan wacday bilayska ama gargaarada degdeg ah.

Minnesota Statute §504B.205 says a landlord can't forbid or limit a tenant's right to call for police or emergency assistance because of domestic abuse, sexual assault or any other conduct.

Qodobka Sharciga ah ee (Minnesota Statute §504B.205) waxa u sheegayaa in qolada gurigu aysan mamnuuci karin ama aysan xadidi karin kiraystaha xaqiisa ah inuu wacan karo bilayska ama gargaar degdeg ah iyadoo sababta wicidu tahay dagaal qoyska dhexdiisa ka dhaca, xoogid, ama falal kale oo xun.

Also, a landlord can't punish a tenant for calling police or emergency assistance. This right can't be waived by other agreements. This state law overrides any local law that may say something different.

Sidoo kale, qolada gurigu uma ciqaabi karto kirayste wacashada bilayska ama gargaarada degdeg ah. Xaquuqdan ma ay saamixi karaan heshiisyada kale. Sharcigani waxa uu buriyaa wixii sharci hoosaad ah ee marmarka qaarkood ka duwanaan kara.

A tenant has the right to bring a civil action in court for a violation of this right by the landlord.

Kireystahau waxa uu xaq u leeyahay in dacwo ku xad-gudubka xaquuqda muwaadinka uu maxkamad ka xareysto hadii qolada guriga ay ku xad-gudubto xaquuqdan.

I have a legal right to call the police or call for emergency assistance.

Waxa leeyahay xaq sharciyan ah oo aan ku wacan karo bilayska ama gargaarada degdeg ah.

Please withdraw your

Fadlan ka noqo

- infraction notice (ogaysiiska ah khalad gaysi)
- notice to vacate (*ogaysiiska ah inaan guriga baneeyo ah*)
- lease termination notice (*ogaysiiska joojinta liiskayga ku saabsan*)
- Other (describe) (*kuwa kale (tilmaam)*)

_____.

Also, if you put any information about this incident in my tenant file, please remove all of that information from my file.

Sidoo kale, hadii aad geliso akhbaartayda ku saabsan arrintan galkayga kireystaha, fadlan ka saar dhamaan akhbaartaa oo dhan galkayga.

Sincerely (*Mahadsanid*), _____